

# Waxaa la diyaarinayaa kurjado tillaabooyin ka-hortag cudur ah

Dawladdu waxay doonaysaa in ay nidaam la saadaalin karo oo kan hadda ka wacan ay siiso qaybaha bulshada ee ay tillaabooyinka koroonuhu waxyelleeyaan. Sidaas darteed ayaa waxaa la diyaarinayaa xeerar guud oo ka kooban kurjado tillaabooyin ka-hortag cudur ah oo haddii loo baahdo la isticmaali karo.

– Waa in aan lahaannaa heegan wanaagsan si loo maareeyo cudurka dillaaca iyo noocyada cusub ee fayraska. Waa in aan xataa u diyaargarawnaa maaraynta waxyalaha aan rajaynayno in aysan dhicin. Kurjadahan tillaabooyinka ka-hortagga cudurka ah ayaa keenaya in la helo nidaam la saadaalin karo oo ka wacan kan hadda. Waa in aan sidoo kale hubinnaa in aan xudduudaha si degdeg ah tillaabooyin uga hirgelin karno haddii ay taas keenaan noocyoo cusub oo fayraska oo is-beddelay ah, ayuu yiri raysal wasaare Jonas Gahr Støre.

Xaaladda mustaqbalka dhow iyo tan mustaqbalka fog midna weli lama hubo. Kurjadaha tillaabooyinka ka-hortagga cudurka ayaa noqon kara aalad la isticmaali karo haddii ay safmarka wax iska beddelaan, oo waxaa loo isticmaali karaa adkaynta iyo fududaynta labadaba. Tillaabooyinka waa lagu jaangooyaa xaaladda markaas jirta, waa in ay ahaadaan kuwo ku habboon oo ku salaysan aqoon-cilmiyeedkii u danbeeyay ee laga helay Machadka Caafimaadka Dadweynaha iyo Agaasinka Caafimaadka.

– Tillaabooyinka ka-hortagga cudurka ayaa cawaaqib weyn ku lahaa bulshada oo idil iyo dhaqaalaheenna. Kurjadaha tillaabooyinku waxay hor iyo horraanba ahaanayaan heegan loo adeegsado go'aammada mustaqbalka laga gaarayo heerarka tillaabooyinka iyo sidii tillaabooyinka looga dhigi lahaa kuwo munaasib ah, lagu kalsoonaan karo iyo sidii laysugu miisaami lahaa waxtarka iyo kharashaadka tillaabooyinka, ayuu yiri Støre.

## **Waxaan rabnaa in ay qaybaha kala duwan ee bulshadu fikradahooda nagu biiriyaan**

Agaasinka Caafimaadka iyo Machadka Caafimaadka Dadweynuhu waxay soo gudbiyeen fikradahooda ku aaddan kurjadaha tillaabooyinka (bogga hawsha loo igmaday – waa soo socdaa). Inta lagu jiro diyaarinta kurjadaha tillaabooyinka waxay wasaaradaha kala duwan hawsha ka qayb gelin doonaan ururrada iyo wakiillada waaxaha ayaga hoos yimaada si ay fikradahooda u soo gudbiyaan. Hadafku waa in la diyaariyo kurjado tillaabooyin ah oo sida ugu wanaagsan u abbaara dantii laga lahaa.

– Waxaan hawsha ka qaybgelinaynaa laamaha ugu muhiimsan si ay kurjaduhu u noqdaan sida ugu fiican ee suurtaggalka ah, iyo si ay meheraduhu sida ugu badan ee suurtaggalka ah diyaar u ahaadaan haddii loo baahdo in kurjadaha la isticmaalo, ayay tiri wasiirka caafimaadka- iyo daryeelka Kjerkol . Si ay haddaba kurjadaha tillaabooyinku waxtarka ugu fiican u yeeshaan ayaa waxaa muhiim ah in aqoon dheeraad ah loo yeesho saamayntooda bulshada. Dawladdu waxay dhowaan dejisay [koox khuburo ah](#) kuwaas oo u kuurgeli doona, oo qiimayn ku samayn doona cawaaqibka bulshada ka soo gaara tillaabooyinka ka-hortagga cudurrada iyo kurjadaha tillaabooyinka.

## **Istaraatijiyyadda cusub ee koroonaha**

Waxay sidoo kale dawladdu ku hawlan tahay cusboonaysiinta istaraatijiyyadda iyo qorshaha heeganka ee maaraynta safmarka. Istaraatijiyyadda cusub waxaa la soo bandhigi doonaa gu'ga 2022-ka, waxayna qeexi doontaa sida aan fayraska ula noolaanayno mustaqbalka fog. Hadafka guud ayaa wuxuu yahay in uu culayska ugu yar ee suurtaggalka ah soo gaaro qofka gaarka ah iyo bulshada guud ahaan. Kurjadaha tillaabooyinku waxay qayb muhiim ah ka noqon doonaan qorshaha heeganka.